

Xuquuqda Daryeel Caafimaad Maskaxeed Heleyaasha oo Kooban

Tani waa xuquuqda daryeel hele ahaaneed oo kooban taasoo ku salaysan ama hoos tagaysa xuquuqda heleyaasha adeega caafimaadka maskaxda. Waxaad xaq u leedahay inaad ka heshid koobi xuquuqda ah hay'adan ama waaxdaa caafimaadka iyo adeega bulshada., xafiiska adeega caafimaadka maskaxda ee dadka waaweyn, 11 State House Station-Mrquard Bldg-2nd Floor, Augusta, Maine 04333, Tel: 287-4200 (Codka), 287-2000 ("TTY" – taleefoonka dhagoolaha). Waxaad ka heli kartaa koobi ama nuqul dhamaystiran oo ku saabsan xuquuqda ciwaankan <http://www.maine.gov/dhhs/mh/rights-legal/index.html>. Hadii aad dhagool tahay ama aadan fahmin ingiriisiga, waxaa lagu heli karaa tarjumaan lacag la'aan ah si aad u fahamtid xuquuqdaada .

1. Xuquuqda Aasaasiga ah: Waxaad leedahay mid la mid ah shacab, dadnimo, yo xuquuqda sharci ee ay yihiin muwaadiliinta oo dhama. Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo xushmad iyo ixtiraam buuxa ee shakhsiyadaada iyo sharaftaada.
2. Dhowrsoonid iyo Awood u Lahaanta Rekodhka: Waxaad xaq u leedahay in rekodhkaaga loo hayo si aad ku kalsoon tahay lana bixin karo wargalin iyo ogolaanshahaaga oo buuxa. waxaad xaq u leedahay inaad iska eegto rekodhkaaga wakhti kasta oo macquul ah. Waad ku dari kartaa warbixin qoraal ah rekodhkaaga si aad u saxdo warbixin aad rumaysantahay inay khaldantahay ama aan dhamaystirayn. Qof kale ma arki karo rekodhkaaga ilaa aad adigu khaas ahaan ugu ogolaato in ay arkaan, ka sokow marxaladaha ku qeexan buuga xuquuqda dhamaystiran.
3. Daawayn Gaar ahaaneed ama Qorshayn Adeeg: Waxaad xaq u leedahay qorshe gaar ahaaneed. Oo ay diyaareen adiga iyo qofka kula shaqaynaya, oo kusalaysan baahidaada iyo u jeedadaada. Qorshahu waa inuu noqdo mid qoraal ah oo aad xaq uleedahay inaad haysato nuqulkiisa. Qorshaha waxaa looga baahan yahay inuu si faahfaahsan uga hadlo qofkasta waxa uu qabanayo. Waxkhtiga loogu talagalay hawsha, xiliga ay dhamaanayso iyo sida loogu guulaysanayo. Qorshuhu waa inuu ku salaysnaado baahidaada dhabta ah iyo, hadii wax qabadka baahidaada lawaayo, faahfaahi sida baahidaada loo heli karo.
4. Ogolaansho la Ogyahay: Adeeg ama daawayn laguma siin karo oo ka dhan ah ogolaanshahaaga, hadii uu jiro qof kaa mas'uul ah, isagu/iyadu waa loo ogol yahay inuu sameeyo go'aan adiga ogolaanshahaaga la'aantii.. Waxaad xaq u leedahay in lagu ogaysiiyo khatarta suuro galka ah iyo faaiidooyinka la filayo ee dhamaan adeegayada iyo daaweynta, ee ay ku jiraan daawooyinta, hab aad fahmi karto hadii aad wax su'aal ah qabto(ama la ogaysiiyo qofka kaa mas'uulka ah) waxyaabaha khatarta ah ama faa'idada ah ee la sii saadaaliyay ee adeeg walba iyo maamulidba oo ay ku jirto daawo siinta iyadoo ay tahay hab aad fahmi karto. Hadii aad su'aalo qabtid, waxaad waydiin kartaa u qaybsanaha howlahaaga ama qof walba oo aad doorato inta aadan go'aan ka gaarin arimaha maamulka iyo adeega.
5. Kaalmaynta Ilaalinta Xuquuqda: Waxaad xaq u leedahay in aad doorato qof mas'uul ah oo kaa caawiya fahmida xuquuqdaada ama kaa caawiya ka shaqaynta maamulida ama qorshaha adeegaaga. Hadii aad rabtid qof mas'uul ah waa inaad qoraal ahaan ku sheegtaa qofka aad dooratay. Waad la kulmi kartaa mas'uulkaaga waqti kasta oo aad rabtid waana beddeli ama baabi'in kartaa doorashadaada waqti kasta.
6. Xuriyada ka fog Figinta iyo Hakinta: Laguma figin karo ama hakin karo habaynta bukaan socodka. Waxa kaliya oo lagu hakinkaraa xaalad aan u dulqaadan Karin taasoo ku salaysan qodobka xaquuqda adeeg heleha Caafimaadka Maskaxda, Qaybta B, Waaxda VII.

7. Xuquuqda Diiwaan Gelinta: Waxaad xaq u leedahay inaad keentid cabashadaada iyo dood kasta oo waxyeeli karta xuquuqdaada ama su'aalo howleed oo kasta. Waxaad xaq u leedahay in cabashadaada lagaaga jawaabo qoraal, iyadoo la socoto sababaha go'aanka waxaad racfaan u qaadan kartaa go'aan ka kasta ee qaybta caafimaadka maskaxda. Laguma ciqaabi karo sinaba feelgelinta cabashadaada. Waxaad la xiriiri kartaa xafiiska ama maamulka the Office of Advocacy, 60 State House Station, Maine 04333, Tel: 287-4228 (Codka), 287-1798 ("TTY" – taleefoonka dhagoolada) ama xarunta laxaad la'aanta (Disability Rights Center), P.O.Box 2007, Augusta, Maine 04338-2007, Tel: 1-800-452-1948 (Codka iyo "TTY" – taleefoonka dhagoolada).

Waxaan helay nuqul (copy) oo ah soo uruurinta xuquuqda ka qaybqaataha Adeega Caafimaadka Maskaxda.

Taariikhda

Saxiixa loo adeegaha

Taariikhda

Saxiixa goobjoogaha